

# UW Medicine

## Tilmaamaha Foomka Arjiga Kaalmada Dhaqaale

Gobolka Washington waxa uu ku waajibiyay dhamaan isbitaalada inay siiyaan kaalmo dhaqaale - shakhsiyaadka iyo qoysaska buuxiya shuruudaha dakhliga qaar. Waxa aad u qalmi kartaa kaalmo dhaqaale iyada oo laga duulayo cabirka qoyskaaga iyo dakhligaaga, xataa hadii aad leeyahay caymiska caafimaad. UW Medicine waxa ay siisaa kaalmo dhaqaale

bukaanka/damiinka wadarta dakhliga qoyskiisu yahay 400% Heerka Saboolnimada Federalka (Federal Poverty Level, FPL) iyo habaynta cabirka qoyska kadib marka caymiska cida kale la wada isticmaalo. Wixii adeegyada xarunta iyo/ama xirfadle ah ee Airlift Northwest, Harborview Medical Center, UW Medical Center, UW Physicians, UW Medicine Primary Care, iyo Valley Medical Center:

- 0% - 300% FPL-ka qiimo dhimis maaliyadeed oo ah 100%

Wixii adeegyada xarunta kaliya leh taariikhaha ka bixitaanka Julaay 1, 2022 ama wixii ka horeeyay ee Harborview Medical Center, UW Medical Center, iyo Valley Medical Center:

- 301% - 350% FPL-ka qiimo dhimis maaliyadeed oo ah 75%
- 351% - 400% FPL-ka qiimo dhimis maaliyadeed oo ah 50%

**Sidde loo bixiyaa kaalmada dhaqaale?** Siyaasada kaalmada dhaqaale waxay khusaysaa adeegyada isbitaalada (xarunta) ku salaysan iyo wixii isbitaalada aan ku salaysanayn (xirfadle ee ay bixiyo UW Medicine taas oo ku salaysan u qalanka. Kaalmada dhaqaale waxaa dhici karta inayna wada bixin dhamaan kharashaadka daryeelka caafimaadka, oo ay ku jiraan adeegyada ay bixiyeen hay'ad kale. Waxa aad ka dalban kartaa macluumaad dheeraad ah ama ka eegi kartaa websaytkeena kaalmada dhaqaalaha [uwmedicine.org/financialassistance](http://uwmedicine.org/financialassistance) ama [valleymed.org/financialassistance](http://valleymed.org/financialassistance).

**Si arjigaaga looga shaqeeyo, waa inaad:** Nasii macluumaadka ku saabsan qoyskaaga oo aad noogu sheegeyso tirada xubnaha qoyska ee gurigaaga (qoyskaaga waxaa kamid ah dadka aad wax iskugu tihiin dhalashada, guurka, ama qoysku korsado ee aad wada degan tihiin)

- Nasii macluumaad ku saabsan wadarta dakhliga bishii ee qoyska (kahor cashuurta iyo inta aan waxba laga jarin)
- Nasii waraaqaha dakhliga qoyskaaga oo nasii bayaanka hantida
- Ku lifaaq macluumaad dheeraad ah hadii loo baahdo, tusaale ahaan, waraaqaha xoojinta ee saxaya macluumaadkaaga
- Saxeex oo ku qor taariikhda foomka

Wixii arjiga Kaalmada Dhaqaale ah iyo waraaqaha xoojinta oo Ingiriisi ah, waxa aad iminka ka heleysaa MyChart (marka laga tago Airlift Northwest) si aad ugu gudbiso waraaqaha ku salaysan goobta daryeelkaaga. Wixii dhamaan arjiyada kale ah waxaa lagu soo gudbinayaa boosta, faakis, ama iyada oo la imanayo. Wixii macluumaad ah ee la gudbiyay si loo eego waxaa loola dhaqmi doonaa macluumaadka caafimaadka la ilaaliyay sida uu dhigayo Sharciga La Xisaabtanka iyo Qaadashada Caymiska Caafimaadka (Health Insurance Portability and Accountability Act, HIPAA)

Nidaamka arjigaaga, waa inaad noqotaa bukaan duwaan gashan oo leh Lambarka Duwaanka Caafimaadka (Medical Record Number, MRN): Wixii ah Harborview Medical Center, UW Medical Center-Montlake, UW Medical Center-Northwest, UW Physicians iyo UW Medicine Primary Care kala hadal Xarunta La Hadalka 206.520.5000 si aad marka hore iskugu duwaan geliso.

<p><b>Harborview Medical Center</b> <b>UW Physicians</b> <b>UW Medicine Primary Care</b> Financial Counseling 325 9th Ave; Mail Stop 359758 Seattle, WA 98104-2499 Taleefan 206.744.3084 FAAKIS 206.744.5187 Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo. – 4:30 galabnimo <a href="http://mychart.uwmedicine.org">mychart.uwmedicine.org</a></p>	<p><b>UW Medical Center-Montlake</b> <b>UW Physicians</b> <b>UW Medicine Primary Care</b> Financial Counseling 1959 NE Pacific Street; Mail Stop 356142 Seattle, WA 98195-6142 Taleefan 206.744.3084 FAAKIS 206.598.1122 Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo. – 4:30 galabnimo <a href="http://mychart.uwmedicine.org">mychart.uwmedicine.org</a></p>	<p><b>UW Medical Center-Northwest</b> <b>UW Physicians</b> <b>UW Medicine Primary Care</b> Financial Counseling 1550 N 115th St Seattle, WA 98133-9733 Taleefan 206.744.3084 FAAKIS 206.598.1122 Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo. – 4:30 galabnimo <a href="http://mychart.uwmedicine.org">mychart.uwmedicine.org</a></p>
<p><b>Valley Medical Center</b> Patient Financial Services P.O. Box 59148 Renton, WA 98058-2148 Taleefan 425.690.3578 FAAKIS 425.690.9578 Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo. – 5:00 galabnimo <a href="http://mychart.valleymed.org/#mychart">mychart.valleymed.org/#mychart</a></p>	<p><b>Valley Medical Center</b> Patient Financial Services 3600 Lind Ave SW, Suite 110 Renton, WA 98057-4970 Taleefan 425.690.3578 FAAKIS 425.690.9578 Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo. – 5:00 galabnimo <a href="http://mychart.valleymed.org/#mychart">mychart.valleymed.org/#mychart</a></p>	<p><b>Airlift Northwest</b> Patient Financial Services 6505 Perimeter Road S., Ste 200 Seattle, WA 98108 Taleefan 206.598.2912 FAAKIS 206.521.1612 Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo. – 5:00 galabnimo</p>

Hadii aad ka qabto su'aalo oo aad u baahan tahay kaalmo buuxinta arjiga, fadlan la xidhiidh xarunta sare ee aad daryeelka ka doonayso. Waxa aad u heli kartaa kaalmo sababta ay doonto ha noqotee, oo ay ku jirto kaalmada laxaad la'aanta iyo luuqada. Waxa aanu kugu wargelin doonaa wixii go'aanka ugu danbeeya ee u qalanka kaalmada dhaqaale iyo xuquuqda rafcaanka, hadii ay ku munaasab tahay, 14 maalmood gudahood oo ka bilaabanta marka aanu helo arjiga kaalmada dhaqaale ee aad buuxisay, oo ay ku jiraan waraaqaha dakhligu. Marka aad gudbisno arjiga kaalmada dhaqaale, waxa aad noo oqolaatay in aanu baadhitaankii loo baahnaa samayso si aanu u xaqiijino macluumaadka.

**Waxa aanu doonaynaa in aanu ku caawino. Fadlan usoo gudbi arjiga sida ugu dhakhsaha badan! Waxaa dhici karta in kharashka lagugu soo dalaco ilaa inta aanu heleyno macluumaadkaaga. UW Medicine iyo Fred Hutchinson Cancer Center (FHCC) waxay wadaagi karaa macluumaadka hadii loogu baahdo in la caawiyo bukaanada doonaya daryeelka ee labada hay'adood (90 maalmood gudahood marka la buuxiyo arjiga). Hadii arjiga ay ansixiyaan labada hay'adood, mudada ansixitu way kala duwaan kartaa.**

# UW Medicine

## Foomka Arjiga Kaalmada Dhaqaale – qarsoodi ah

Fadlan dhammaan xogta wada buuxi. Haddii ayna ku munaasab ahayn, ku qor “NA.” Ku lifaaq bogag dheeraad ah haddii aad u baahato.

### BAADHITAANKA XOGTA

Ma waxaad u baahan tahay turjumaan?  Haa  Maya Haddii ay haa tahay, qor luuqadda aad doorbidayso:

Bukaanku muu dalbaday Medicaid?  Haa  Maya Waxa dhici kartaa in looga baahdo inuu marka hore dalbado intaanu eegin kaalmada

Miyuu bukaanku leeyahay caymiska caafimaadka?  Haa  Maya

Bukaanku muu qaataa adeegyada dadwaynaha ee sida TANF, Raashinka Aasaasiga ah, ama WIC?  Haa  Maya

Bukaanku ma bilaa guri baa?  Haa  Maya

Daryeelka caafimaad ee bukaanku ma waxa uu la xidhiidhaa shil baabuur ama dhaawac shaqada ka soo gaadhay?  Haa  Maya

### FADLAN FIIRO GAAR AH

- Kuuma dammaanad qaadi karno inaad u-qalmayso kaalmada dhaqaale, xataa haddii aad dalbato.
- Markaad soo dirto arjigaaga, waxaanu eegi doonaa dhammaan xogta waxaanu kaa dalban karnaa xog dheeraad ah ama caddayn dakhliga ah.
- 14 maalmood gudahood kadib marka uu na soo gaadho arjigaaga dhammayska tiran iyo dokumentiyadu, ayaanu kula soo socodsiiin doonaa haddii aad u-qalanto kaalmada.

### XOGTA BUKAANKA IYO QOFKA DALBANAYA

Magaca Hore ee Bukaanka	Magaca Aabaha Bukaanka	Macaga Awowga Bukaanka
<input type="checkbox"/> Lab <input type="checkbox"/> Dheddig <input type="checkbox"/> Wax kale (oo sheegaya _____)	Lambarka Diwaanka Caafimaadka (MRN)	Taariikhda Dhalashada Bukaanka
Cidda Bixinta Kharashka ka Masuulka ah (Dammiinka)	Xidhiidhka Bukaanka uu la Leeyahay	Dhalashada Dammiinka Taariikhda
Cinwaanka Waraaqaha lagu soo Diro		Lambarka Xidhiidhka ee Guud ( ) _____ ( ) _____ Cinwaanka limeylka: _____
Magaalada	Gobolka	Sib Koodhka

Xaaladda Shaqaalenimo ee Qofka Masuulka ka ah Bixinta Kharashka:

- Shaqeeya** (Taariikhda shaqada uu bilaabay: \_\_\_\_\_)  **Ma shaqeeyo** (muddo intee le'eg: \_\_\_\_\_)  
 **Iskii u Shaqaysta**  **Arday**  **Naafo ah**  **Hawlgab ah**  **Wax kale** (\_\_\_\_\_)

### XOGTA QOYSKA

Liiska xubnaha qoyska ee guriga deggan, oo ay kamid yihiin adiga. “Qoys” waxaa kamid ah dad aad isku dhiig tihiin, guur isku kii keenay, ama la koriyay oo aad wada deggan.

**XAJMIGA QOYSKA** \_\_\_\_\_ *Ku lifaaq bog dheeraad ah Haddii aad u baahato*

Magaca	Taariikhda Dhalashad	Xidhiidhka Bukaanka uu la Leeyahay	Haddii aad tahay 18 jir ama kawayn: Magaca cidda loo shaqeeyo	Haddii aad tahay 18 jir ama kawayn tahay: Isugaynta dakhliga	Sidoo kale dalbanaya kaalmo
					Haa / Maya
					Haa / Maya
					Haa / Maya
					Haa / Maya

**Dhammaan dadka waawayn ee qoyska dakhligooda waa in la sheegaa. Ilaaha dakhliga waxa kamid ah, tusaale ahaan:**

- Mushaharrada - Lacagta bilaa-camalka la siiyo - Iskua u shaqaysiga - Magdhawga shaqaalaha - Lacagta naadada la siiyo - SSI - Taakulada ilmaha/xaaska

# Foomka Arjiga Kaalmada Dhaqaale – qarsoodi ah

## MACLUUMAADKA DAKHLIGA

**XASUUSNAW:** Waa inaad raacisaa arjigaaga caddaynta dakhliga.

Waa inaad bixisaa xogta dakhliga qoyskaaga. Xaqiijinta dakhliga waxa looga baahan yahay si loo ogaado u-qalanka kaalmada dhaqaale. **Dhammaan xubnaha qoyska ee 18 jir ah ama kawayni waa inay shaaciyaaan dakhligooda. Haddii aanad waraaqo caddayn ah keeni karin, waxaad soo gudbin kartaa warqad aad soo qortay oo aad saxeexday oo aad ku sharraxayso dakhligaaga. Fadlan caddayn soo raaci il kasta oo dakhli oo aad sheegtay.**

**Tusaalayaasha caddaynta dakhliga waxaa kamid ah:**

- Bayaanka cashuur jarista “W-2”; ama
- Waraaqaha mushaharka ee wakhtigan (3 bilood); ama
- Bayaanka Bangiga (3 bilood); ama
- Cashuur bixintii sanadkii hore, oo ay la socoto jadwaladu haddii ay ku munaasab tahay; ama
- Qoraal, bayaanada cidda loo shaqeeyo oo saxeexan ama cid kale (warqad caddayn ah) oo lagu sheegayo xaaladdaada dhaqaale ee wakhtigan haddii aanad hayn caddayn dakhli; ama
- Foomamka ansixinaya ama diidaya u-qalanka Medicaid iyo/ama kaalmada caafimaadka gobolku bixiyo; ama
- Foomam ansixinaya ama diidaya magdhawga shaqo la’aanta; ama bayaan qoraal ah oo cidda loo shaqeeyo ama hay’adaha caydha ka socota.

Haddii aanad hayn caddayn dakhliga ama dakhligaba aanu kusoo galin, fadlan kusoo lifaaq bog dheeraad ah oo aad ku sharraxayso.

## XOGTA KHARASHKA

(Fadlan ku lifaaq bog kale si aad ugu taxdo daymaha kale, haddii

Waxaanu xogtan u isticmaalaynaa si aanu sawir buuxa uga helno xaaladdaada dhaqaale.

Kharashka Qoyska Bishii:

Kirada/Daynta Guriga

\$ \_\_\_\_\_

Kharashka Caafimaadka

\$ \_\_\_\_\_

Kharashka Caymiska

\$ \_\_\_\_\_

Laydhka, biyaha iyo gaasta

\$ \_\_\_\_\_

Daymaha/Kharashaadka Kale

\$ \_\_\_\_\_ (biilka carruurta, daymaha, daawooyin, wax kale)

## MACLUUMAADKA HANTIDA

Baaqiga Wakhtigan ee Xisaabta

\$ \_\_\_\_\_

Baaqiga Xisaabta Kaydka

\$ \_\_\_\_\_

Qoyskaagu hantiyahan kale ma haystaan?

**Fadlan calaamadi dhammaan kuwa ku munaasabka ah**

Saamiyada  Curaaro (Bonds)  401K  Xisaabta Kayga Caafimaadka  Masuul hanti

Hantida (oo uu ku jiro guriga la deggan yahay)  Ganacsi gaar ah

## MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Fadlan ku lifaaq bog dheeraad ah hadii uu jiro macluumaad kale oo ku saabsan xaaladaada dhaqaale oo aad doonayso in aanu oqaano, sida mushkilad dhaqaale, dakhli xiliyeed ama kumeel gaadh ah, ama dhimashada qof.

## HESHIISKA BUKAANKA

Waxa aan fahansanahay in UW Medicine iyo FHCC macluumaadkoodu uu kala duwanaan karo iyada oo eegaya macluumaadka daynta iyo macluumaadka ay ka heleyaan ilo kala duwan si ay uga caawiso inay go'aamiyaan u qalanka kaalmada dhaqaale ama qorshayaasha bixinta lacagta.

Waxa aan xaqiijinayaa in macluumaadka sare uu yahay run oo uu saxan yahay ilaa inta aan ogahay. Waxa aan fahansanahay hadii macluumaadka aan bixiyay la ogaado inuu been yahay, inay keenayso in la ii diido kaalmada dhaqaale, oo waxa aan ka masuul noqonayaan oo la iiga fadhiyaa in aan bixiyo lacagta adeegyada la i siiyay.

Magaca Qofka Duwanaan

Taariikhda